



King County

Waaxda Maaratmaad Maxkamad Caddaaladdeedka

Barbara Miner

Agaasimaha iyo Karaaniga Maxkamadda Sare

(206) 296-9300 (206) 296-0100 TTY/TDD

Gacaliye Macaamiil:

Xogtan waxaa laguu siiyay si ay kaaga caawiso oo ay kuu sharaxdo mas'uuliyaddaada dhanka la shaqaynta Maxkamadda Sare ee Deegaanka King County [King County] ee gacanta kula jira lacagta ganaaxa ee lagugu yeeshay ee waajibaadyadaada lacagta sharciga (LFO) ee dib u celinta, kharashka maxkamadda iyo wixii ganaax ah ee lagu leeyahay.

Fadlan nala soo xiriir wakhti alla wakhtigii aad rabto si aan uga wada hadalno waajibaadka adiga ku saaran ee lacagta adiga lagugu leeyahay, qorshaha tartiib-tartiib u bixinta, marka cinwaankaaga aad beddesho ama wixii kale ee anigu aan wax kaala qaban karno. Wuxaan furan nahay **Isniinta – Jimcaha, 7:00 a.m. - 5:00 p.m. ka soo wac 206-477-0818.**

WAXAA MUHIIM AH: Si aan si wanaagsan u wada shaqayno, **waa in aad** karaaniga **LFO** aad ku soo wargelisaa haddii cinwaanka boostada aad beddesho. Si cinwaanka aad u beddesho waxaad ku samayn kartaa adiga oo soo waca, boosto warqad ku soo dira ama qatka internetka ayaad ku beddeli kartaa <http://www.kingcounty.gov/courts/clerk/programs/LFO.aspx>.

ADIGA OO MEESHA TAGA OO ISKA BIXIYA

Halkaas ayaad tagi kartaa oo waxaad ku bixin kartaa kaarka kareedidka ah ama kaarka deebidka ilaa iyo \$500, lacag naqdi ah, jeega (money order) ama jeega (cashier's check). Waan ka xunnahay, ma ogolaan **karno** in aad ku bixiso jeeggaga caadiga ee adiga aad iska leedahay (personal checks). Lacagta money orderka ama jeega (cashier's ceck) ku soo qor: "King County Clerk"

Shaqsii ahaan lacagta waxaad ku bixin kartaa adiga oo yimaada **Isniinta illaa Jimcaha, 9:00 ilaa 4:30 labadan meel midkooda ayaad imaan kartaa:**

(Maxkamada Dhalinyarada [Da'yarta] way xiran yihiiin saacaddaha qadada laga bilaabo 12:15-1:15 pm)

Maxkamada Deegaanka King [King County Courthouse] Xafiiska Clerk's Office – Dabaqa 6 ^{aad} 516 3 rd . Ave, Room E-609 Seattle, WA 98104	Qeybta Dalinyarradda (Juvenile Division) Xafiiska Clerk's Office – Dabaqa 3 ^{aad} 1211 E. Alder St Room 307 Seattle, WA 98122	Xafiiska Clerk's Office ee Xarunta Maleng Regional Justice Center Clerk's Office – Dabaqa 2 ^{aad} 401 4 th Ave. N, Room 2-C Kent, WA 98032
---	--	---

LACAGTA MARKA AAD BOOSTADA KU SOO DIRAYSO

Lacagta waxaad ku soo diri kartaa dhanka boostada adiga oo soo diri kara jeega (money order) ama jeega (cashier's check) kaliya. Waan ka xunnahay, ma ogolaan **karno** in aad ku bixiso jeeggaga caadiga ee adiga aad iska leedahay (personal checks).

Lacagta money orderka ama jeega (cashier's ceck) ku soo qor: "King County Clerk" oo jeega ku soo diri cinwaankan:

King County Courthouse
ATTN: Cashiers
516 3rd. Ave, Room E-609

Seattle, WA 98104

Bogga hore ee jeega (money order) ama jeega (cashier's check), ku soo qor:

1. **Magacaaga** sida ku qoran warqadda maxkamadda ay soo dirtay ama lagaa siiyay
2. **Lambarka dacwadda kiiska (case number)** kasta ee aad lacagteeda iska bixinnayso
3. **Inta \$ lacag ee aad bixinnayso kiis lambar kasta ku hor qor**

Haddii aad rabto in rasiidka aan kuu soo dirno, jeega aad soo dirayso soo raaci baqshad cinwaankaaga ku qoran oo farangaboolana ku dhegan soo raaci. **Aad baan kaaga mahad celinnaynaa dareenka aad siinaysid xogtan**, waxaanna rajaynaynaa in aan sida wanaagsan kaaga caawin kamo Waajibaadyada Lacagta Sharciga ee lagugu yeesho.

Seattle:
516 Third Avenue Room E609
Seattle, WA 98104-2386

Xarunta Caddaaladda ee Gobolka
401 Fourth Avenue North Room 2C
Kent, WA 98032-4429

Qeybta Dalinyarradda (Juvenile Division):
1211 East Alder Room 307
Seattle, WA 98122-5598